

## **Fiiro u yeelo Macluumaadka hadda ah!**

**Taariikhda 23.3.2020**

Dowladda Federaalka iyo Dowlad-Goboleedyadu waxay ku heshiiyeen in la ballaariyo tilmaamaha Go'aanka laga gaaray Taariikhda 12. Maarso, oo ah in la xaddido xiriir Bulsheedka. Tani waxay sidoo kale khusaysaa Hessen:

1. Muwaadiniinta waxaa lagu dhiirigelinayaa, inay xiriirka ay la leeyihiin Dadka kale ee ka baxsan gurigooda u yareeyaan sida ugu yar ee lagama maarmaanka ah.
2. Meelaha guud, meel kasta oo suurta gal ah in Dadka kale, marka laga reebo Dadka lagu xusay lambar I. la ilaaliyo ugu yaraan masaafo gaaraysa 1,5 Mitir.
3. Joogitaanka Goobaha guud waxaa loo oggolyahay oo keliya kaligaaga, ama qof aan gurigaaga kugula nooleyn, ama xubno ka tirsan reerkaaga ee kula nool.
4. Wadada shaqada loo aado, daryeelka degdegga ah, dukaamaysiga, booqashooyinka Dhakhaatiirta, ka qeybgalka shirarka, ballamaha iyo imtixaannada lagama maarmaanka ah, caawitaanka dadka kale ama isboortiga shakhsiyeed ee hawada bannaanka ah iyo sidoo kale howlaha kale ee lagama maarmaanka ah, dabcan kuwaas wali waa suurtagal.
5. Kooxo dad ah oo ku damaashaadaya meelaha guud, guryahooda iyo sidoo kale Xarumaha gaarka ah marka la fiiriyo xaaladda halista ah ee waddankeenna ku suganyahay, ma'aha mid la aqbali karo. Ku xadgudubka ka dhanka ah Xayiraadaha-Xiriirka, waxaa kormeeraya Xaafiiska xeerka iyo Booliiska, waana lagu ciqaabayaa xadgudubka.
6. Makhayadaha waa la xirayaa. Marka laga reebo geynta iyo soo doonashada cuntooyinka lagu cuni karo guryaha.
7. Shirkadaha adeegyada ee qaybta darjeelka jirka sida Timo-Jaraha, istuudiyaha is qurxinta, ku dhaqanka duugista, istuudiyaha- taatoo ga iyo Shirkadaha la midka ah waa la xirayaa, maxaa yeelay isku dhawaanshaha jirku waa lagama maarmaan. Daaweynta caafimaadka ee lagama maarmaanka ah, ta wali waa suurtagal.
8. Dhamaan Shirkadaha iyo gaar ahaan kuwa leh taraafikada Dadweynaha, waxaa muhiim ah in loo hogaansamo Xeerarka Nadaafadda iyo Tallaabooyinka ilaalinta ee waxtarka leh oo loogu talagalay Shaqaalaha iyo Booqdayaasha.
9. Tallaabooyinkani waxay ansax yihiin ugu yaraan labo Toddobaad.

Macluumaadka dheeriga ah waxaad ka helaysaa khadka BILAASHKA ah **Telefoon: 0800 555 4 666, waxaa la heli karaa Saacadda 8 ilaa 20. Macluumaadku wuxuu sidoo kale ku qoranyahay APP HessenWARN iyo bogga internetka [www.Hessen.de](http://www.Hessen.de) .**